


Dhaqtarkaaga wuxuu kuu qoray
Benferol si lagaaga daaweeyo ama
looga hortago feetamiin D la'aanta


 **benferol**[®]
CHOLECALCIFEROL

Daawaynta feetamiin la'aanta




50,000 IU kaabsool jilicsan 	2 kaabsool mudo 1 asbuuc ah	1 kaabsool/bishii	2 kaabsool/bishii	Tirada asbuucyada <input type="checkbox"/>
	Kuuro kale: <input type="text"/>			Booqashada soonoqoshada, taariikhda: <input type="text"/>



25,000 IU kaabsool jilicsan 	1 kaabsool/asbuucii	1 kaabsool/bishii	2 kaabsool/bishii	Tirada asbuucyada <input type="checkbox"/>
	Kuuro kale: <input type="text"/>			Booqashada soonoqoshada, taariikhda: <input type="text"/>

Daawada maaraynta iyo kahortaga




400 IU kaabsool jilicsan 	1 kaabsool/ maalintii	2 kaabsool/ maalintii	Kuuro kale: <input type="text"/>	Tirada asbuucyada <input type="checkbox"/>
				Booqashada soonoqoshada, taariikhda: <input type="text"/>




800 IU kaabsool jilicsan 	1 kaabsool/ maalintii	2 kaabsool/ maalintii	Kuuro kale: <input type="text"/>	Tirada asbuucyada <input type="checkbox"/>
				Booqashada soonoqoshada, taariikhda: <input type="text"/>



5,600 IU kaabsool jilicsan 	1 kaabsool/ asbuucii	2 kaabsool/ asbuucii	Kuuro kale: <input type="text"/>	Tirada asbuucyada <input type="checkbox"/>
				Booqashada soonoqoshada, taariikhda: <input type="text"/>



25,000 IU kaabsool jilicsan 	1 kaabsool/bishii	2 kaabsool/bishii	Kuuro kale: <input type="text"/>	Tirada asbuucyada <input type="checkbox"/>
				Booqashada soonoqoshada, taariikhda: <input type="text"/>

Benferol[®] (cholecalciferol) soft capsules, (vitamin D3). Rx. F. ATC codkoodka: A11CC05. **Muujiinta (400, 800 iyo 5,600 IU):** Prophylaxis iyo daawaynta feetamiin D la'aanta ee dadka waawayn iyo caruurta hada qaangaartay. Waxay caawimaad khaas ah utahay daawaynta lafa qalooqa ee bukaanka halista ugu jira feetamiin D la'aanta, sida ficana lagu daray Kaalshiyaam. **Muujiinta (25,000 and 50,000 IU):** Prophylaxis iyo daawaynta feetamiin D la'aanta ee dadka waawayn iyo caruurta hada qaangaartay. (caruurta da'doodu tahay ≥ 12 sanadood). Feetamiin D la'aanta waxaa lagu qeexaa iskugaynta 25-hydroxycholecalciferol ah (25(OH)D) < 25 nmol/l. Waxay caawimaad khaas ah utahay daawaynta lafa qalooqa ee bukaanka feetamiin

D la'aanta ay hayso ama halista ugu jira feetamiin D la'aanta, sida ficana lagu daray Kaalshiyaam. **Kuurada ugu fican:** 1 kaabsool 400 IU or 800 IU/maalintii Kuurada maalintii waa inaysan kabadnaan 4,000 IU. Taa badalkeed waxaad qaadankartaa 1 kaabsool 5,600 IU/asbuucii ama 1 kaabsool 25,000 IU/bishii. Feetamiin D la'aanta calaamadiisa la arkay, kuuro culus oo 2 kaabsool x 50,000 IU ayaa lasiin karaa mudo hal asbuuc ah. **Mawduucyada:** Halkii kaabsoolba wuxuu kakoobanyahay 400 IU, 800 IU, 5,600 IU, 25,000 IU or 50,000 IU oo cholecalciferol ah si isku xigta. Taariikhda dib loo eegaayo PSC-da: 28-12-2016. Wixii macluumaad dheeri ah, ayna kujiraan qiimaha iyo baakadgaraynta, fadlan booqo www.fass.se and www.tv.se

benferol[®]

CHOLECALCIFEROL

Waa maxay feetamiin D?

Feetamiin D waa feetamiin buuran oo qasmaayo. Waxaan kuhelnaa feetamiinka labo qaab: dhinaca cuntada iyo dhinaca qoraxda marka guriga kabaxno. Feetamiin D ga cunta waxaan inta badan kahelnaa kaluunka; salmonka, heerinka iyo mackerel, tusaale ahaan, waxay kakoobanyihiin feetamiin D badan. Waxyaabaha caanaha laga sameeyo, malaadada iyo fidada sidoo kale waa ilo feetamiinka laga helo oo uhiim ah hadii lagu daro feetamiin D. Qoraxda ayaa nasiisa feetamiin D 90 boqolkiiba, taasoo ah sababta mararka qaar loogu yeero "feetamiinka qoraxda". Xiliga xagaaga waxaad feetamiin D kugu filan kahelaysaa adoo banaanka qoraxda leh aadaaya xiranaayana buume iyo garan ama funaanad mudo rubucu saac ah maalintii dhawr jeer asbuucii.

Waa maxay feetamiin D la'aanta?

Feetamiin D la'aanta waxay timaadaa markii feetamiin D ga kuyar yahay jirkaaga. Tani waxay keeni kartaa dhibaatooyin caafimaad farxad la'aan iyo xanuun badanba leh. Feetamiinka D3 ee jirku uu soosaaro, shaqadeeda ugu wayna aytahay inay fududayso kasoo dhuuqida kaalshiyaamka iyo fosfeetka xiidmaha, si markaas lafaha si quman ugu kobcaan.

Feetamiin D la'aan daran waxay jilcin kartaa lafaha wayna qaloocinkartaa, wax loo yaqaan markay dadka waawayn kudhacdo osteomalacia markay caruurta kudhacdana rickets. Xanuunadaan badanaa waa kuyarihiin Galbeedka laakiin way soobateen sanadahaan danbe, ayna keenikaraan badanaa isbadal kudhacay hababka nolosha. Feetamiin D la'aanta waxay keeni kartaa lafo la'aan iyo shaqada murqaha oo isdaba marta. Sidaa awgeed waa muhiim in ladaweeyo feetamiin D la'aanta waqti kasta oo ugu horeeysa.

Maxaa sababa feetamiin D la'aanta?

Loolkeena Waqooyi kaliya waxaan feetamiin D kahelnaa qoraxda xiliga bilaha xagaaga lagu jiro, laga bilaabo Abriil ilaa Sebteember. Sidaa awgeed waxaa jira halis aad ubadan oo ah in feetamiin D la'aan ay timaado xiliga Dayrta. Marka laga tago xaqiiqada ah in cuntooyinka qaar ay kabuuxdo feetamiin D, way adagtahay in laqaato kuurada maalinlaha ah ee loo baahanyahay. Hadii aad siixirato maryo kuwaasoo sanadka dhan kudaboolaaaya, aad cunto nafaqo gaar ah ama aad wax badan joogto gudaha guriga, halistaada feetamiin D la'aanta way sii

kordhaysaa. Waxyaalaha kale ee halista keena waxaa kamida da'da, midabka jirka iyo cayilka. Markaan sii waynaano, awooda maqaarkeena ee ubadalida ilayska qoraxda ee UVB ga loo badalo feetamiin D way soo yaraataa si joogtaa. Hadaad samayso xadi dheelitiran 15-20 daqiiqadood oo qoraxda joogtaa way kugu filnaankartaa xiliga xagaaga si jirkaaga uu sameeyo feetamiin D ga aad ubaahantahay, laakiin hadaad madawdahay waxaad ubaahan kartaa 5-10 jeer oo dheeraad ah. Dadka buurbuuran waxay badanaa qabaan feetamiin D la'aan marka loofiirsho dadka caadiga ah. Cilmi baarayaasha wali sifican uma xaqiiqsan sababta, laakiin waxay ubadantahay inay laxariirto xaqiiqada ah in feetamiin D ga lagu kaydsho calaayada xayirta kadibna aan jirku isticmaalikarin.

Sidee ayaa ku ogaanaysaa in feetamiin D la'aan kuhayso?

Feetamiin D yaraan aan badnayn waxay badanaa muujisaa astaamo aan cadayn ama maba lahan astaamo. Feetamiin D la'aan daran, dhanka kale, waxay keeni kartaa:

- tabar dari murqaha ah oo guud
- xanuuno garbaha, tagoogaha, sinaha iyo bowyaha
- xanuuno murqaha garbaha, tagoogaha, sinaha ama bowyaha

Mararka qaar xanuunka aad ayuu udarnaan karaa ilaa ay adkaato inaad socoto ama aad istaagto.

Daawaynta feetamiin D la'aanta

Baarista iyo daawaynta feetamiin D la'aanta waxaa badanaa lagu sameeyaa GP. Baarintaan dhiiga ah oo fudud ayaa cabiri kara heerka feetamiin D ga ee jirka kujira, kaasoo lagu muujiyo cabirka nmol/L. Heer 25 nmol/L ama kayar ayaa badanaa loo qaataa si loomuujiyoo feetamiin D la'aanta.

Daawada waxtarka leh ee feetamiin D la'aanta waxaa lahelikaraa ayadoo kaniini ah ama dhibco ah oo dhaqtar kuuqoro. Kuurada feetamiin D da way kala duwantahay qof ilaa qof waxayna kuxirantahay, waxyaala kalana ay lajiraan, sida uu feetamiin la'aantu udaranyahay iyo haday jiraan xaalado caafimaad oo kale kuwaasoo saamaynarka qaadashada jirka ee feetamiin D da. dadka qaar waxay ubaahanyihiin inay feetamiin D cunaan maalinkasta, dadka kale halmar asbuucii ama bishii.

Waxaa lagu qoray Benferol[®]

Waa maxay Benferol maxaana loo isticmaalaa

Benferol waxaa kujira feetamiin D3 kaasoo fududeeya soodhuuqista dheefinta kaalshiyaamka iyo kumilida kaalshiyaamka xuubabka lafaha. Benferol waxaa loo adeegsadaa kahortagida iyo daawaynta feetamiin D3 la'aanta kudhacda dadka waawayn iyo caruurta hada qaangaartay. Dhaqtarkaaga wuxuu kuugu qori karaa Benferol inay kaabid unoqoto daawo khaas ah oo lafo beelka ah. Benferol waxay ku imaadaa nooc jilicsan, kaabsool ukun ahaan usamaynsan oo ay kujirto saliid jaale qafii ah.

Saliida kabsoolka kujirta waxaa laga sameeyaa aysiido baruurta geedka ah, cinjirka kaabsoolkuna waa Xalaal waxaan shahaado siiyay Kosher ka.

Sida loo isticmaalo Benferol

Markasta u isticmaal daawadaan sida saxda ah ee dhaqtarkaagu ku amray. Waxaad waydiin kartaa dhaqtarkaaga ama farmashiyoolahaaga hadaadan hubin. Kaabsoolada waa in kurti biyo lagu laqaa. Benferol waxaa lacuni karaa cunto ama cunto la'aanba. Daawadaan macuni karaan caruurta kayar da'da 12 sano.

Waxyeelooyinka kadhalkara

Sida daawooyinkoo dhan, daawadaan waxay keeni kartaa waxyeelooyin, inkastoo aysan qofkasta haleelin.

Si aan badnayn (waxay ku imaan kartaa 1 oo kamida 100 kii isticmaale):

Hypercalcaemia (tirada badan ee kaalshiyaamka ee dhiiga kujira) iyo Hypercalcaemia (tirada badan ee kaalshiyaamka ee kaadida kujira).

aan badnayn (waxay ku imaan kartaa 1 oo kamida 1,000 kii isticmaale):

Cuncunka, jir googo'a (pruritus/urticaria).

Si aad uhesho macluumaadka daawada, fadlan booqo: www.fass.se

Cadaymo: www.livsmedelverket.se
www.internetmedicin.se
Svenska Osteoporosförbundet

ADEEGA DARYEELKA CAAFIMAADKA

DHAQTARKAYGA

TELEEFANKA



Caafimaad Laysku halayn karo
Rotebergsvägen 1a, 192 78 Sollentuna, Tel: +46 (0)8 626 20 17.
E-mail: infonordic@consilienthealth.com

SE/BEN/0317/0006